

In The Loop

Qoraalka Codadka Qaxotiga

Qoraalka Codadka Qaxootiga waxaa loogu talagalay soo bandhigada dhibaatooyinka heysto bulshada Qaxootiga ah iyo waliba bulshada martida looyahay oo ku nool Dadaab iyo xaal u helidooda. Tani waa wareysiyo iyo Macluumaad ku saabsan caabuqa Coronavirus iyo fahanka aasaasiga xalka daruriga ah, iyo sideey diinta Islamka ka qabto. Waa wareysi lalayeeshay mid ka mid aah culumaa diinka Soomaaliyeed. Wareysigaa waxaa laga soo tabiyaay Star FM' Nairobi iyo Radio Gargaar 97.1FM Dadaab. Waa barnamij isbuclaa ah layirahdo "Bilan Show."

SUALO DIINEYD OO QUSEEYO CORONAVIRUS

Sual: Wamaxaay sabaabta lo xiray masaajidada?

Jawaab: Xiritaanka masaajidada waxaa sabaab u ah amar kaso baxay dowladda. Dowladda Kenya kaliya mahaan ee dalal kale oo ummadaha Musliminta addunka dhan ay qaadeen tallaabo isku mid ah si loo xakameeyo fayruska. Si la mid ah nadaafadu waa tallaabo muhiim ah ka hortago fayruska, jiiheynta bulshada. Waxaan ognahay qofki qabo fayruska imuu yimaado isuku imaatin dad badan oo goob jog ah ayaa cudurka qaadi doona. Tani waa sababta ka dambeysa mamnuucista. Sidaa darted, waxaan leenahay xorriyadda Allah meel kasta aadku baaryi kartid, aan ku dukano guryaheena, oo aan taxaddarno.



Si joogto ah gacmaha ugu dhaqo biyo socdo iyo saabuun

S2: Sidee meydka qof u dhinto Fayruska lo maydhi karaa, oo side lagu aasi karaa?

Jwb: Suuragal maahan in la maydho maydkii qofki u dhintay Fayruska qatarta uu leeyahay awgeed, hase yeeshe salaadda aaska walagu qaban karaa inkasto oo masafo fog laga istagaayo. Hadeysan suuragal aheyn in lagu dukaddo salaadda janaasada oo tilmameyso tilmamaha dowlada, ikhtiyaarka aaska, iyo qabashada aaska meel kale ka duwan aya la sahmin karaa. Waxaan arkay waddamada qaarkod sida Srilanka xaal u arkay la gubo, tani waa qalaad maxa yeelay waa mamnuuc in la gubo qof walbo oo bani'adam ah. Haddi dadka dhintay ay adkato in la aaso kaligis mise laagu aaso qabri u gaar ah oo dadka ay badan yihiin waxa jiro ikhtiyaar u ah qabri wadareed lagu aaso.



Xiro maaskaro ama afduubka loo yaqaano facemask

S3: Maddaama masaajidada la xiray, majiraan aalado ay Imaamyada/aqoonyahannada Soomaaliyeed adeegsan karaa sii ay usii wadaan baahinta fariimahooda diiniga ah?

Jwb: Haa, aqoonyahanada iyo imaamyada waxey adeegsaan aaladaha warbaahinta ee dijitaaliga sida baraha bulshada, TV-ga, iyo raadiyasha si ay u faadiyaan fariimaha. Tani waxa kujiro dareenka aragtida dadka diinta Islamka ee Fayruska Corona.



Aad ha ugu dhawaan qofka kale waxaadna u jirtaa ugu yaraan hal miitir

S4: Xilliyadii nabiga miya masaajidada la xiray jiray marki uu dilaco daacuun?

Jwb: Xilligii Nabiga iyo asxaabti, masaajidada marnaba looma xiri jiriin amarro kaso baxo dowlada ama talo cilmiyeed ay soo jeediyaan aqoonyahanada ama imaamyada, balse waxa jiray mararka qaar dadka ay qo'aansadeen ineysan taagin masaajidada oo ay doorteen iney ku dukadaan guriga.



Gurigaaga joog oo ha ka soo bixin hadii dan muhiim ah aadan lahayn

S5: Soomaalidu waxay aaminsan tahay iney Muslimniintu uusan ku dhici kaarin Fayruska, muxu yahay aragtida Shiiqa ee arintas?

Jwb: Tani waa fikrad khaldan. Fayruska waxaa qaado karo qof kasta, dad badan oo muslimiin ah aya dhintay, halka kuwo kale ay kujiraan xalaad aad u liidato, waana laga daaweyaa. Inti lagu jiray waqtiga Nabiga qaar badan oo ka mid saaxiibbadiisa u dhowaa waxey u dhinteen cudurka daacuunka. Musiibo deg deg ah ay qof walbo ku dhici karto. Ma doorato diin mise shaqsi ha ahado Muslim or Kiristaanka. Waxan dadka ku boorin lahaa iney ficilkooda muujiyaan oo si taxaddar leh u muujiyaan.



Hadii aad isku aragto astaamaha la midka ah hergabka sida qandhada, qufac, neefsashada oo ku dhibto isbitaal tag

S6: Waxaan jeclaan lahaa inan weydiyo Shiiqa sida meydka qofki u dhinto Fayruska Korona lo dhaaqi karo maxa yeelay waxaan maqalnay iney ku duuban yihiin balaastikada si loo xakameeyo faafitaanka Fayruska, side baa aaska loo fulin doonaa?

Jwb: In kasto oo ay tahay waajib diini ah in la dhaaqo qofki dhintay, duruufaha noocaas ah, haddana waa la ogol yahay in wax laga qabto xaalada sida ugu wanaagsan ee suurtagalka ah sii loo hubiyo in qofna uusan ku dhicin mise usaan qaadin. Xaaladdan oo kale biyo ku rushaynta Jirka aya ah ikhtiyaarka kaliya ee awood u siinaya awood salaadda aaska inu dhaco.